# CAWAYSYADA SAAMALAYLKA

## *Urur Maansooyin Ah*

CALI ILEEYE

2023

"Waxaan u hibeeyay diiwaankan habeen noolayaasha dhafarka badan, heer ay xiddigaha oo dhan tiriyeen".

"Cali Ileeye"

# Tusmo


| | |
|---|---|
| 0. Hordhac | 6 |
| 1.0. Qaybta Koowaad | 14 |
| 1.1. Daruurtii Murugada. | 15 |
| 1.2. Maalmaha Jahliga | 21 |
| 1.3. Waraaq Ku Qor Oohintaada | 28 |
| 1.4. Dhafar | 30 |
| 1.5. Ayaamaha Taashka Xidhan | 35 |
| 2.0. Qaybta Labaad | 39 |
| 2.1. Buuraha Dunida Iyo Daalo | 40 |
| 2.2. Cilladaha Jacaylka | 42 |
| 2.3. Qiso Jacayl | 44 |
| 2.4.Qalbigu Saaxiib Ma Yeesho | 45 |
| 2.5. Nolashayda Kaalay | 47 |
| 2.6. Raynrayn | 49 |
| 2.7. Jidka Nolosha | 51 |

3.0. Qaybta Saddexaad 53
3.1. Dhalad 54
3.2. Soomaalinimo 57
3.3. Daruuraha Caafimaadka 60
3.4. Taariikh 62
3.5. Xaqlihii Dhulka 64
4.0. Qaybta Afraad 66
4.1. Quddus 67
4.2. Qusdandiin 70
4.3. Ubixii Janada 72
5.0. Qaybta Shanaad 74
5.1. Tusaale 75
5.2. Addoomuhu Waa Danayste 77
5.3. Dariiqa Ilayska 79
5.4. Daruurta Rejooyinkayga 81
5.5. Bashar 83
5.6. Bushaaro 85
6.0. Xogta Abwaanka 87

# 1

Soomaalidu waxay caan ku tahay cabudhinta dareenka dabiiciga ah ee qofka. Inaad sarbeeb iyo sogordoh kusoo gudbiso shucuurkaaga mooyee, si saraaxa leh haddii aad u bandhigto, waxa laguugu jawaabayaa waayaha laabtaada ku hayso. Dabarkan dhaqan ee qalafsan, wuxuu sal ku leeyahay miyiga iyo nolosha raacatada ee diifta badan. Xoolaha maalin oo dhan waa la foofiyaa, toddobaad kastana waa la arooriyaa; jiilaal iyo abaar kasta waa la raraa, baad iyo biyo ayaana loo raadiyaa. Taasi waxay ka dhigtay qofka Soomaaliga ah ee raacatada ahi inuu noqdo dhagax, aan damqasho lahayn, oo ka qatan dareenka naxariista iyo raxmadda ee noolaha. Magaalagalkii kadib, Soomaalidii waxay noqdeen kuwo dusha ka xidhan dhar magaalo, balse hoosta ku wata dhuuxii raacatada. Qofna kugu ma boorrinayo

in aad cabato, balse xasuusnow inay dabiici tahay inay ilmadu dhabankaaga qoyso marka aad sagxadda taallo, iyo inay gawsahaagu qosol dartii muuqdaan marka aad figta ku taagan tahay. Taas haddii la waayo, shucuur kasta oo aad gudahaaga ku cabudhisaa, oogadaada ayuu ka soo muuqanayaa isaga oo cudur ah, sida ay culimada nafsigu sheegeen.

## 2

Noloshu waa hayaan, habeenka iyo maalintuna dharaar kasta waa kuwo cusub. Afku wuu korayaa, dadku wuu isbeddelayaa, deegaankii waa laga guurayaa, habfikirkiina wuu is geddiyayaa, agabkii waa la cusboonaysiinayaa. Markaa ma aha in ay maansaduna halkii taagnaato, iyaduna waa in ay hayaanka raacdo, haddii kale cidlo ayaa lagaga dhaqaaqayaa. Sida uu xusay Miikhaa'iil Naciima, suugaantu waxa ay dabooshaa

afar baahiyood oo uu aadamuhu leeyahay:

**Kow:** baahida aynu u qabno sheegista waxa ka guuxaya uurkeenna, sida rejada iyo quusta, guusha iyo jabka, iimaanka iyo shakiga, jacaylka iyo nacaybka, damqashada iyo doocaansiga, murugada iyo farxadda, cabsida iyo xasilloonida.

**Laba:** baahida aynu u qabno dhabta. Waa xaqiiqada nafaheenna iyo xaqiiqada caalamka inagu xeeran.

**Saddex:** baahida aynu u qabno quruxda. Ruuxdeennu waxay qabtaa harraad aan ku cokanaanin quruxda mooyaane wax kale.

**Afar:** baahida aynu u qabno muusiga. Ruuxdu waxa ay leedahay jamasho ay u qabto codadka iyo laxannada, oo aad u qotodheer. Waxa ay isla ruxdaa gariirka onkodka, qulqulka biyaha, iyo jabaqda caleemaha. Suugaanta dhabta ahina waa ta u daboosha baahiyaheennaas afarta ah, si

cusayb iyo curin leh, ee ma aha mid ku dabran sooyaal iyo sabo laga yimi.

## 3

Abwaankii hore wuxuu ahaa afhayeen beeleed, xaalkiisuna wuxuu ku xidhiidhsanaa xaalka beesha ee guud: farxad iyo murugo, colaad iyo nabad, guul iyo jab, abaar iyo aaran. Inkasta oo ay jirto inay abwaannada weli tolnimadu saamayn ku leedahay, waxa habboon abwaanka casriga ahi in uu noqdo jire madaxbannaan, oo dhacdooyinka iyo qadiyadaha casriga ah u soo bandhiga sida uu u arko shakhsi ahaan iyo sida ay u saameeyeen shucuur ahaan, balse ma habboona inuu noqdo mikirifoon ay dad kale ka soo dhex hadlaan.

# 4

Abwaannadii hore marka ay maanso tirinayaan waxay adeegsan jireen gabay ama geeraar. In kasta oo ay ina soo gaadhay suugaan kale oo leh jiifto, masafo, buraanbur iyo hees dhaqameed badan (hees hawleed, hees ciyaareed iyo hees carruureed) oo god kasta lihi, haddana dookha abwaannada ee koowaad waxa uu ahaa gabayga. Hal-abuur badani markii ay taa maqleen, waxay ku dhegeen gabayga iyo geeraarka. Hadda, gabayga iyo geeraarku kama adka godadka kale, oo qof kasta oo maanso curin karaa iyagana waa uu tirin karaa, iyaga balse waxay ka tahay awowyaashayadii hore way gabyi jireen, annaguna markaa waanu gabyaynaa. Gabayga, geeraarka, jiiftada, haanta, saarka, sabaalaha, caddaloolka, heellada iyo godadka kale, waa gal ama nashqad tixeed, oo nuxur lagu soo gudbiyo. Suugaanta

dhadhanka iyo macnaha waxa u yeelaa, ma aha galka ay ku jirto oo keliya, balse waa dulucda ay xanbaarsan tahay, farshaxanka hummaagga, xulashada erayada iyo shucuurka ay gudbinayso. Sidaa darteed, waxa la helayaa jiifto boqollaal gabay ka qiimo badan, iyo haan boqollaal geeraar ka tayo wanaagsan. In wax la bedbeddelo, oo hadba nashqad iyo nuxur la isku tijaabiyo ayaa habboon. Marakudhegnimadu waa ta keentay in gabaygu liinbaxo, suuqii maansaduna musalafo, oo ay dadku ka xiise dhacaan.

## 5

Aqlabiyadda sare ee Soomaalidu waa shacab qudha oo wadaaga af, diin, dhaqan, sooyaal, deegaan iyo dano mid ah. Inkasta oo uu gumaysigu kala qoqobay dhulka Soomaalida, ama ay iyaguba maanta yeesheen tobannaan calan oo kala duwan, haddana waxa jirta xabag isu haysa walaalaha kala

ordaya, taas oo ah Soomaalinimo iyo Islaaminimo. Soomaalinimo ku aroorta afka, isirka, deegaanka, hiddaha iyo dhaqanka; iyo Islaamnimo ku qotonta diinta iyo sooyaalka.

Mar kasta waxa ina mideeya ayaa ka badan, waxa ina kala kaxeeya. Sidaa darteed, xilka saaran qofka indheergaradka ah, ee dhaladka ah, waa inuu waraabiyo geedaha midnimada iyo wadajirka. Haddaba, cawaysyada Saamalaylku waa urur maansooyin ah oo ka tallaabsanaya xayndaab kasta oo cabudhinaya dareenka aadamaha. Waa tixo ku dhiirranaya ku luuqaynta shucuur dad badan hoos ula ilmeeyaan. Waa maansooyin naf-ka-hadal ah oo qotodheer iyo kuwo jacayl ah oo xanxanto leh. Waa hawraar soomaalinimada iyo islaamnimada dabkooda shidaysa. Waa suugaan nashqad ahaan iyo nuxur ahaan ba

cusub.

# Qaybta Koowaad

## 1.1. DARUURTII MURUGADA

*Habeen kale oo dam yidhi*
*Dadkoo badi jiifka leday*
*Daruurtii murugadaa*
*Dushayda ka hooraysee*
*Walaaca haddaan dardhado*
*Miyaan gamayaa dermooy.*

*Dalaayad naftoon lahayn*
*Cabsida igu soo da'daay*
*Duunkayga qodxaa ka baxay*
*Markuu daadkaagi galay.*

*Qol daahyo madow le baan*
*Cawaysyadan diiqaddaa*
*Dareen taban kula shiraa*
*Xiskuna wuxu duubayaa*
*Cajaladaha dayradaa.*

*Markaan furo daaqadaha*
*Rejada laga daawadana*
*Xusuusahan wada dabkaa*
*Ayaa soo daayay huur.*

***

*Markii subax diiggu ciyo*
*Indhuhu waxay doonayaan*
*Inay dibad soo arkaan,*
*Jidhkayguna wuxu dalbaday*
*Sariirta inuu dulyaal.*

*Markuu duhur bacadku jiro*
*Qalbigu wuxu doonayaa*
*Daryeel naxariis ku ladhan*
*Dadkiisa inuu ka helo,*
*Xiskayguna wuxu dalbaday*
*Ma karo dibindaabyadee*
*Insaan qabka haw dullayn.*

*Xubnahan wada dirirayiyo*
*Dagaal uma taag hayee*
*Naftaydan dayawga badan*
*Inaan daldalaan rabaa.*

***

*Da'daydu markay yarayd*
*Dabciga ubax baan ahaa*
*Xareedda ku doogsadee,*

*Abaaro dawaafayiyo*
*Illeyn waxa jiray diraac.*

*Markaan dugsi hoose galay*
*Dalkaba waxan moodi jirey*
*Degmada reer hebel degee*
*Illeyn duni baa camiran*
*Tan iyo dura soo taxnayd.*

*Markaan afarrey duryamo*
*Haddaan toosh daaran jirey*
*Cadceedda daraandarkiyo*
*Dayaxa gudcur nuuriyaa*
*Didiibso illeyn i baray.*

***

*Damiirku baraarug toos*
*Caqligu dabarkii furfuray*
*Dibnuhu way wayraxeen*
*Haddana dawakh bay galeen.*

*Dabeecadda xaynta dhaaf*
*Garaadka daboolan jiidh*
*Waxaan duugoobin keen,*
*Dun baad tahay gooniyee*

*Noloshan isku dayashadaa*
*Ka doorso markaan is idhi*
*Badweyn baan dalaq ku idhi*
*Dabbaasha anoon aqoon*
*Hirkeedu is-diiddo yahay.*

*Qab iyo dabin baan ku dhacay*
*Afkaaruhu ii dadeen*
*Xiskayga ayaa deldelan.*

*Sidii denbi ruux ku kacay*
*Dadkaan ka qaloonayoow*
*Haddaad iga doonaysaan*
*Warkii duryankayga iyo*
*Shaleyto dabkaan lahaa*
*Dareenkii iga lunyoo*
*Nalkii gudahaa i demay.*

*Hiyiga i dawaafiyee*
*Cusaybka u doolayoow*
*Adaa dakhar iigu wacan,*
*Haddaan doqon noqon lahaa*
*Dugsada sheekada bulshada*
*Intaan is dabbaalsho saw*
*Dibnuhu qosol may barteen.*

*Duruufta ayaamihiyo*
*Hankayga dabeyl ruxdaay*
*Galool damalaan ahoo*
*Duufaannadu ima ridaan..*

*Anoo daalaan socdaa*
*Anoo diidaan kacaa*
*Isdhiibkana uma dabcee*
*Hir baan dalandool u ahay*
*Docdiisa barwaaqo taal.*

*Haddaan keligay dakhramay*
*Haddaan keligay damqaday*
*Haddaan keligay is-deday*
*Haddaan keligay dibjiray*
*Haddaan keligay degdegay*
*Haddaan keligay dibdhacay*
*Haddaan keligay daf tumay*
*Haddaan keligay digriyay,*
*Cidlada keli duubnidaa*
*Duruus baan kala baxoo*
*Durrada dhinaceeda togan*
*Durduur murtiyaa ku taal.*

*Garaad yahow daydaygii*
*Abaartu hadday darnayd*

*Daruur xasillooniyiyo*
*Waxaan ku qubaystay daad.*

*Waxaan u dabbaaldegaa*
*Ayaamaha daahirkaa*
*Mugdiga dayax nuuriyoo*
*Dunida tan u soo baxee*
*Maxaa dabshidkii ka hadhay?*
*- 2020*

## 1.2. MAALMAHA JAHLIGA

*Meelaha qurxoon*
*Magacyada qalaad*
*Madalaha qabow*
*Maamule qab weyn*
*Midna kuma qancee*
*Qayb baa i maqan.*

*Macmacaanka yaal*
*Ifka uma muhdee*
*Maskaxdaydan baa*
*I mashquulisoo,*
*Anigay malluug*
*Cirka meere jira*
*Malagyada ku nool*
*La midow i tidhi.*

*Dadka maalintii*
*Maal raadsadoow,*
*Murannada naftiyo*
*Mahadhooyin baan*
*Dhex muquufsanahay.*

*Mirta dhexe habeen*
*Kuwa mootanoow,*

*Hees murugaliyo*
*Maansooyin baan*
*Qol yaroo madow*
*Milyan jeer dugsaday.*

*Ruuxdayda madhan*
*Macno inan u helo,*
*Maahmaaho iyo*
*Kumannaan murtiya*
*Buugtaan ku mamay*
*Mililkii ma dhayin.*

*Maskaxdii insiga*
*Muslin iyo kufriba*
*Mad'habtoodi baan*
*Iyagana martiyay,*
*Mugdi igama tegin.*

*Maalmaha in badan*
*Masjid baan galoo,*
*Maradayda iyo*
*Gadhka lagu mashquul.*

*Mashaqada adduun*
*Majaraha hagiyo*
*Mooryaanta Yurub*

*Xadhkahay mareen*
*Yara milicsadoo*
*Muudh baan dhexgalay.*

*Fikir maammin iyo*
*Maanshiilis baa*
*Waqti iga madhshoo,*
*Keli maahistiyo*
*Hadalkayga maqan*
*Inaan ahay maraan*
*Dadku ii malee.*

***

*Oday macangagoo*
*Kaymaha mirtoo*
*Miyi lagu suntaa*
*Jahli igu mudoo,*
*Cilmigii magaal*
*Madaxayga rogan*
*Maaareyn u waa.*

*Kas mukhaabaraad*
*Uu maamuliyo*
*Miinooyinkii*
*Uu dhigay Madkhali*

*Sida malag wadeed*
*Garashada makale.*

*Nin maqaar cadoow*
*Iska maamuloo*
*Dhalanteed ku maal*
*Mar haddaad is tidhi,*
*Waxan ahay madow*
*Hanka kula midee*
*Midigtaada eeg.*

***

*Nin mirqaansanoo*
*Mijin ruugayoo*
*Mugdi kuududaan*
*Iska maagayee,*
*Maskaxdiisa dihin*
*Isagaa macnaha*
*Duni lagu maldahay*
*Muujmuujinteed*
*Mufti uga dhawaa.*

*Masalooyin adag*
*Weydiin mug weyn*
*Murtimeer u noqo.*

*Runta meel ku sheeg*
*Xaqa maydhaxdiir,*
*Waa maxay mabda'a*
*Masa lagu yahee*
*Dadnimada u mudan?*

*Macaluushan daran*
*Cuduradan mutuxan*
*Mayd iyo dagaal*
*Maag iyo takoor*
*Musuqmaasuqiyo*
*Dhiig miirashada*
*Dhulka yaa ku maray?*

*Talo murugtayeey*
*Dadku waa mishiin*
*Mise waa makhluuq*
*Maya dooran kara?*

*Meertada ifkaa*
*Murugada dhashee*
*Malakuudka sare*
*Ma la yahay mabsuud?*

***

*Mashaqada an galay*
*Waa maangadoo*
*Marmar waxan idhaa*
*Cashar baad martee*
*Minka aad dhex timi*
*Waa maalmihii*
*Mahdigii dhulkiyo*
*Ciisaha maqnaa*
*Ama maasukhii*
*Isha midig la'aa.*

*Duni muunad laay*
*Dadka mooggan baa*
*Madhax kaa helood*
*La macaan tehee,*
*Inta maanka furan*
*Madhax baad la tahay.*

*Maansada baqdaay*
*Dad munaafaqaad*
*Magantood tahee,*
*Waxan maagganahay*
*Afka lama marshee*
*Adiguba malee.*

*Waa midho islaam*
*Soomaali midab*
*Maanmaal galbeed*
*Iyo magac carbeed*
*Ruux lagu dhex milay*
*Oo muran la nool.*
*-2020*

## 1.3. WARAAQ KU QOR OOHINTAADA

*Dharaar werwer uu ku fuulay*
*Walaacyadu waa culayse*
*Waayaha ha ku haysan laabta*
*La qaybso walaal dhibtaada.*

*Habeen walbahaar da'aayo*
*Daruuraha wahabka keena*
*Markuu waqalkoodu hooro*
*Guryaha wehelkaaga booqo.*

*Ayaamuhu waa wareere*
*Haddii dhulku kula wareego,*
*Cirkaa garab laga wacdaaye*
*Wardiga xadhigiisa hayso.*

*Waqtiga adag ee hadheeyay*
*Hadday naftu wayraxayso,*
*Rabbiga waanwaan la qaado*
*Wanaaji dheh maalmahayga.*

*Adduunka haddaad ka waydo*
*Qof aad la wadaagto sheeko*
*Qalinku nafis buu wataaye*

*Waraaq ku qor oohintaada.*
*-2020*

## 1.4. DHAFAR

*Dharaaruhu waa farriimo*
*Farriimuhu waa dhanbaallo*
*Dhanbaalladu waa xusuuso*
*Xusuusuhu waa dhinbiilo*
*Dhimbiiluhu waa xanuunno*
*Xanuunnadu waa dhawaaqyo*
*Dhawaaqyadu waa kufniinno*
*Kufniinnadu waa dhaqaaqyo*
*Dhaqaaqyadu waa maqaallo*
*Maqaalladu waa dhigaallo*
*Dhigaalladu waa duruuso,*
*Duruusaha aan ka dheehday*
*Markaan dhaawaca waraystay*
*Waliba dhugashada quluubta*
*Kuwuu waayuhu dhirbaaxay*
*Haddana dhimashada ka toosay.*

*Kashii dhibran baa dareenta*
*Ilmada dhaban kale ku taale,*
*Dhadhaabta bacaad is tuushay*
*Miyay dhadhanshaan kulaylka*
*Dareen dhagaxoobayoow ba'.*

*Habeenka dhibaatadiisa*
*Mugdiga dhabanaanintiisa*
*Dhantaalkiyo baylahdiisa*
*Walaac dhulgariiradiisa*
*Dhab naareed jiifsadkiisa*
*Dhafarka isrogaanroggiisa*
*Cidlada keli dhuubnidiisa*
*Dhinbiil ku istaagistiisa*
*Dhaqaaq kolna joogsigiisa*
*Dhaliil taban maamintiisa*
*Dhegaysiga iimihiisa*
*God weyn ka dhex yeedhidiisa*
*Dhawaaq gacal daydaygiisa*
*Dawiyo dhakhtar doonistiisa*
*Dhegaha laga awdaygiisa.*

***

*Ciryahaw tixdu dhawranaysay*
*Markuu dhibicaagi baaqday*
*Dhudaha gabaygaa abaaday.*

*Mankii dhihistaad ahayde*
*Markey dhadhay fiilistaadu*
*Dhillowyahan baa u faanay*
*Intii dhamas iyo galoola.*

*Araartiyo dhiirranaanta*
*Kul iyo dhamac baad ahayde*
*Markuu kaahaagi dhuuntay*
*Qabawyada dayradhaafka*
*Dhedaa midhihii hadhaysay.*

*Markaad dhoollaha caddeyso*
*Ayay farxaduhu dhashaane*
*Markay dhaantadu ku wayday*
*Cadhaa dhabqinaysa jiibta.*

***

*Dhaliisha kuwii ka waabtay*
*Sidii xayntey dhaqmaane*
*Bagaad dhacantii ka boodday.*

*Kuwii jilay dhoohanaantu*
*Dhulkay iska daaqayaane*
*Bagaad cirka sare u dhaaftay.*

*Dhurwaagu tilmaamihiisa*
*Ammaano hadduu ku dhaabay*
*Kaskaan ka dhagaysanayne*
*Bagaad dhaqankiisa diidday.*

*Siduu hadba dhaan u raacay*
*Rar buu u dhintaa dameere,*
*Intaad keligaa dhaqaaqday*
*Bagaad dhimirkaaga maashay.*

***

*Ha moodin inaad dhuyaalka*
*Nafyahay keli dheelmanayso*
*Fac baa jidka qaaday dheere*
*Kabaha samirkaaga dhuuqso.*

*Xilligan dhakafaarka keenay*
*Bal eeg dhadhankayga maanso*
*Waxaan dhamayaa qadhaadhka*
*Qadhaadhkii dhugashadayda.*

*Haddii dhaldhalaal korkayga*
*Badhaadhe ka dheehdo aadmi*
*Mugdiga dhuuxayga aasan*
*Ilmada dhacaysaa taqaanna.*

*Haddii nacas dhagi u seexday*
*Hurdadu dhakhso ugu timaaddo*
*Habeenkiyo dheeridiisa*
*Indhaha dhafrayaa yaqaanna.*

*Haddii dhal magaalo joogtay*
*Daruuraha aanay dhaadin*
*Gu'yaal badan dhoolka baaqday*
*Dhibtuu baday duul harraaday*
*Nin xoolo dhaqdaa yaqaanna.*

***

*Waqtigu waa dhabanba jaade*
*Xalay fooraa dhacaayay*
*Bal eeg cirkan dhaysta keenay*
*Barwaaqadu waa dhankeenna.*

*Hadduu dhamac shiday is-waagu*
*Dhibcaha is-helkaa qaboojin,*
*Nacaybku hadduu dhugleeyay*
*Jacaylkaa baasi dheesha.*

*Hadduu hadal been ku dhaartay*
*Dhigaalka ayaa run sheegi,*
*Hadduu mugdi dhega adkaaday*
*Cadceedda ayaa dhirbaaxi.*
*- 2021.*

## 1.5. AYAAMAHA TAASHKA XIDHAN

*Waqtigan qurux tiicayiyo*
*Ayaamahan taashka xidhan*
*Ayaan la taxaashayee*
*Miyay talow waarayaan?*

*Habeennada tawsta badan*
*Hu'goodii tuurayoo*
*Xilkoodii waan tirshee,*
*Arooryahan tiixu jiro*
*Dharkii farxaddaan toshee*
*Haddaan tamashlaha u baxo*
*Turaanturro may jirtaa?*

*Tanaadku hadduu yimaad*
*Toggii naxariista waday*
*Si togan uma wada galee*
*Biqiyo tuhun baan qabaa.*

*Waxaa tincad igu dhexriday*
*Cabsidan tiinkeedu baxay*
*Waqtiga dhiniciisa taban.*

*Maxaa jirey maalmo tagay*
*Intaan ka tasoobay yool*

*Tilmaantuna iga luntoo*
*Hankaygii uu tukubay.*

*Maxaa jirey maalmo tagay*
*Higsiga tartan loo galiyo*
*Tubtii noloshee wacnayd*
*Ayaankaan tiigsan jirey*
*Tareenka intaan ka dhacay*
*Qabkiyo tamartaan lahaa*
*Tirada dhimashada noqdeen.*

*Maxa jirey maalmo tagay*
*Tashuush werwer saaqayoo*
*Indhahan tacabkoodi lumay*
*Hurdadi ka tahriibtayoo*
*Tolkood dhafar uu ahaa.*

*Maxaa jirey maalmo tagay*
*Kaskaygu intuu tallamay*
*Tudhaalnimo iigu yidhi*
*Hadday noloshii tan tahay*
*Tabaalaha lagu sharraxay*
*Bal aan dhimashada toydee*
*Tubteedu ma xaadhan tahay?*

*Maxaa jirey maalmo tagay*
*Intuu toggu ila rogmaday*
*Tiirkii samirkeen qabsaday*
*Sidii tarraq kala firdhaday.*

*Maxaa jirey maalmo tagay*
*Intuu tamarli'i i biday*
*Walaacu i toogtayoo*
*Xiskaygii tuhun u go'ay.*

*Maxaa jirey maalmo tagay*
*Tandhaafka culays dartii*
*Intaan gefka tawba idhi*
*Tasbiixdana aan qabsaday.*

*Tafiirta Samaale iyo*
*Firkii Tiirida qof ahi*
*Si fudud uma talaxgabee*
*Ka nooli tafaafulkii*
*Ayaamuhu igu tufeen.*

*Tusbuxu farajkuu dhaloow*
*Cirkii aan tuugi jirey*
*Wakaa da'ay taakulee*
*Takbiirta ku soo dhawee.*

*Tusmada fikirkayga wacan*
*Tabaha akhriskayga dheer*
*Talada ehelkayga diran*
*Ducada hooyee tufka le*
*Walaal taageero badan*
*Asxaab tabantaabo hura*
*Taqwada aan quusta geyin*
*Ayaan tasow kaga jidbaxay.*

*Waqtigan qurux tiicayiyo*
*Ayaamahan taashka xidhan*
*Ayaan ayaa la taxaashayee*
*Miyay talow waarayaan?*
*- 2020*

# Qaybta Labaad

## 2.1. BUURAHA DUNIDA IYO DAALO

*Buuraha dunida iyo Daalo*
*Naftaan isku doorsanayne*
*Waxaa dumar koonka jooga*
*Dookhaygu aduu ku raacay.*

*Dabeecadahaaga fiican*
*Markaan tirintooda doonay*
*Xuskooda ayaan ku daalay*
*Anoon kugu diidin shayna.*

*Gu'geennii dookh wadaagga*
*Daruuraha jamashadaadu*
*Markay ku da'een kashayda*
*Waxaan dardhanaayay xiise.*

*Markuu daad caashaq qooyay*
*Naftaydan ku daawanaysa,*
*Qalbiga damac baa ku beermay*
*Dareen kalgacayl cagaar ah.*

*Daweeya xiskayga deeqa*
*Dabdamis yimi goor dab oogmay,*
*Daryeeela naftayda dooja*

*Daruur heshay duni abaara.*
***-2016***

# 2.2. CILLADAHA JACAYLKA

*Cagaarka ayaamahayga*
*Maqnaantaadaa casaysay,*
*Caleenta rejooyinkaga*
*Cadceeddaadaa ka raagtay.*

*Caways la bax baan lahaaye*
*Qol baan keligay ku ciiday,*
*Qaxwaha la cab baan lahaaye*
*Jid baan keligay carraabay.*

*Cajiibka xasuusahayga*
*La'aantaadaa carshaysay,*
*Ciyaartiyo dhaantadayda*
*Codkaaga ayaa ka baaqday.*

*Cidladu wehel bay rabtaaye*
*Dhul baad tahay ciirsi joogin,*
*Naftuna cosob bay rabtaaye*
*Cir baad tahay aan da'aynin.*

*Qofkaygow caashaqeennu*
*Hadmuu talow caadiyoobi,*
*Intuu cilladaha ka raysto*
*Hadmuu talow caafimaadi?*

***-2017***

## 2.3. QISO JACAYL

*Qorraxyahay dushayda ka muuqataa*
*Qalbigayga eegmada daalisaye*
*Quruxdaada yaad ka amaahataa*
*Ma qoftaan jantaad is xigaashataan?!*

*Qalbiyahow naftayda waraabiyaa*
*Xiisaha ayaa kugu soo qubtoo*
*Waadigan qaraamiga caashaqee*
*Ma jacayl qabyoobay ayaa ku helay.*

*Maalmahan jacaylkuba waa qandhee*
*Iga qaad kulkaaga ma doonayee,*
*Murugada qolkaygana waan nacee*
*Badda qoorrigeeda bal ii kaxee.*

*Waayahan qoftaydi ma muuqatee*
*Qotonkeeda waanan illaawahayn*
*Haasaawaheeduna waa qaxwee*
*Qosolkeeda waanan ka maarmahayn.*

*Boholyow naftaad wada qaadatee*
*Qiso yahay jacayl igu dheeridaa,*
*Ma xiskaygan baan abid quusanayn*
*Qalbi jabay maxaa lagu caafiyaa.*

*-2018*

## 2.4. QALBIGU SAAXIIB MA YEESHO

*Naftaydani suufiyawga*
*Xaraabe adduun ka soomman*
*Si aan dhadhan ugu sameeyo*
*Mar baan idhi saaka guurso.*

*Garaadkaa igu su'aalay*
*Jacayl safar weeye dheere*
*Haddaad sahan li'i hayaanto*
*Sareedo miyaad ku gaadhi?*

*Naftaydani saamalaylka*
*Caways subaxdii ku gaadha*
*Si aan hurdo ugu sameeyo*
*Mar baan idhi saaka guurso.*

*Garaadkaa igu su'aalay*
*Qof kaad is lahayd ku seexo*
*Hadduu muran kugu salaamo*
*Miyaad soojeed ka baaqsan?*

*Sunnaha kalgacaylka weeye*
*Hadduu ka saqiiro caashaq*
*Qalbigu saaxiib ma yeesho.*
*-2019*

## 2.5. NOLASHAYDA KAALAY

*Noloshayda kaalay*
*U samee nayaayir,*
*Niyaddayda oomman*
*Naxariis waraabi.*

*Qalbigayga noogay*
*U samee nasiimo,*
*Ii nuuji ruuxda*
*Neecawda caashaq.*

*Noloshayda kaalay*
*U horseed nasteexo*
*Kashan nuurka doontay*
*U siraad nalkaaga.*

*Naashnaash qudhayda*
*Murugadu nugleysay,*
*Nabarrada xumaanta*
*Ka nadiifi laabta.*

*Noloshayda kaalay*
*U bilow naruuro*
*Nasashada xis doonay*

*Ugu baaq negaadi.*

*Noobiyad sideeda*
*Nabar iiga soo hir,*
*Biligtana u naadi*
*Naakhuud hallaabay.*

*Qof jacayl la nooli*
*Ma yaqaan nacaybka,*
*Waa sida naftayda*
*Nabadduun u heesta.*
*-2020*

## 2.6. RAYNRAYN

*Riyada dhaayahan ku daalay*
*Runtaada qurxoon u muuji,*
*Tixdaydan rafaadka miirta*
*Midhaha raaxada u tuuji.*

*Caqligan hadba laydha raaca*
*Rasmiga caashaqa ku jooji,*
*Lugahan xiisaha u roora*
*Jacayl raage ah ku xooji.*

*Qalbigan boholyawgu riiqay*
*U soo curo roobabkaaga,*
*Xubnahan jiilaal ku raagay*
*U soo rogmo daadadkaaga.*

*Kul baan iska reebayaaye*
*Qabow ku rushee naftayda,*
*Inaan xasilaan rabaaye*
*Ku beer naxariis rugtayda.*

*Ciryahow raynraynta keenay*
*Rumee filashooyinkayga,*
*Intaad raxmad ii darroorto*
*Ramaas ku fur geeddigayga.*
*-2022*

## 2.7. JIDKA NOLOSHA

*Jiilaalka roob igu soo da'aay*
*Jewigayga waad wada doojisaa,*
*Jeegaanta kaaha qurxoon leheyeey*
*Indhayahayga waad wada jiidataa.*

*Joohaar iftiinta habeenkiyeey*
*Jiiftooyin baan kuu tirinayaa,*
*Maalmaha jimcaha ugu wada sitaay*
*Sida Juun ayaan ku ammaanayaa.*

*Rejadaydu waa lugo wada jiree*
*Jidka nolosha waan kula raacayaa,*
*Jibbadaydu waa aqal wada galee*
*Cimrigayga waan kula joogayaa.*

*Ruuxdaadu waa jeex iga midee*
*Jirrab oo dhan waan kuu diidayaa*
*Qalbigaagu waa midka igu jiree*
*Jabka murugta waan kaa dhowrayaa.*

*Kani waa jacayl abid waarayoo*
*Jaamacadahaa lagu dhiganayaa,*
*Kani waa jannada nolol lagu hirtoo*

*Jiilkeennu wuu nagu faanayaa.*
***-2022***

# Qaybta Saddexaad

## 3.1. DHALAD

*Inkastooy dhaliilaan*
*Dhaska ay ku caayaan,*
*Dhulka waxan u jecelahay*
*Weli buuro dhumucliyo*
*Surad dhawristeediyo*
*Xeebteenna dheeriyo*
*Hawd iyo dhirtiisiyo*
*Banka dhaqatinkiisiyo*
*Dhoobleyda webigiyo*
*Markaan oogo dheehdaan*
*Carro Waaq ku dhaataa.*

*Inkastooy ka dhoofeen*
*Cadaw uga dhaqaaqeen*
*Afka hooyo dhaafeen*
*Ku kaleeto dheegteen,*
*Dhulka waxan u jecelahay*
*Weli ubax dhallaanoo*
*Soomaali dhigatoo*
*Ku dhawaaqda alifkiyo*
*Barayaasha dhaladkaa*
*Marka aan dhagaystaa*
*Jirrid aan dhacayniyo*
*Dhidib ii arooraa.*

*Inkastooy dhantaaleen*
*Dhaqankooda aaseen*
*Dhagaxow ku sheegeen*
*Gaal soo dhageysteen*
*Ama Carab dhaweysteen*
*Dhimirkooda doorsheen*
*Isirkooda dhumiyeen,*
*Dhulka waxan u jecelahay*
*Abtirkayga dheeriyo*
*Hiddehayga dhaawacan*
*Weli duul dhayaayoo*
*Nabarkiisa dhawroo*
*U dhafraaya baa nool.*

*Inkastooy ku dheeleen*
*Dhigashada hilmaameen*
*Dhalanteed run moodeen*
*Wax qalaad dhitaysteen*
*Suugaanta dhaafeen*
*Dhaxalkooda lumiyeen,*
*Dhulka waxan u jecelahay*
*Dhallinyaro barbaaroo*
*Buugaagta dhigatoo*
*Tixda dhiirrigeliyoo*

*Dhaantada u heesoo*
*Dhalinaaya yool baa*
*Dheeftoodu nooshahay.*

*Inkastooy dhibtoodeen*
*Dhugucdooy is-dooxeen*
*Dhiiggooda miirteen*
*Dhimashada la jaareen*
*Dadka qaar is-dhiibeen*
*Ama kala dhaqaaqeen*
*Toban calan ku dhaarteen,*
*Dhulka waxan u jecelahay*
*Weli geesi dhiig loo*
*Dhegxumada ka diriroo*
*Midnimada ku dhaatoo*
*Xiddigteenna kala dheer*
*Isu soo dhoweeyoo*
*Dhabta sheegayaa badan.*
*-2019*

## 3.2. SOOMAALINIMO

*Buuraha Surad baa u dheer*
*Hankana Soomaalinimo,*
*Gobtuna silic way martaa*
*Haddana saxariir ma tiro.*

*Abaartuna waa sunnee*
*Hadduu jiro sabanxumaad*
*Waxaa xiga berisamaad*
*Sagsaagguna waa dhammaad.*

*Galool samadaa jiroo*
*Salkuna u aroorsan yahay*
*Ayaan sabo kula dhashoo*
*Qabkaygu ma suuli karo.*

*Samada calankaa ku ladhan*
*Ayaa sanka taag i faray,*
*Adkaysoo samir lahow*
*Bilaha soonkaa i baray.*

*Daruuraha sixirka iyo*
*Intaan saxalkani dul iman*
*Sammaaluhu wuxu ahaa*
*Naflaha madow ugu sandheer.*

*Sadhada tafaraaruqiyo*
*Intaan soocsoocu fidin*
*Saf iyo cudud buu lahaa*
*Cadaawuhu kaga sasaan.*

*Alloow solonsii bulshada*
*Sokeeye inay yihiin*
*Sinjiga ka midaysanoon*
*Waqood kala soocmahayn.*

*Sariir lagu wada gamaay*
*Banaadir sal noo ahow,*
*Hargeysaay sabawanaag*
*Siraad baxay noo ahow,*
*Salaantii wadajirkaay*
*Jigjiga samaddoon ahow,*
*Tilmaantii sawracaay*
*Cartaay xeer ii samee,*
*Sarree waad mudan tahoo*
*Sedkaaga hel Gaarisaay.*

*Mar aan saadaal furfuray*
*Xalay waxa lay sawiray*
*Geyiga nabad saaqday iyo*
*Sareedo dadkoo u leday*
*Waxay sugayeenna helay.*

*Buuraha Surad baa u dheer*
*Hankana Soomaalinimo*
*Gobtuna silic way martaa*
*Haddana saxariir ma tiro.*
*-2020*

# 3.3. DARUURAHA CAAFIMAADKA

*Dalkeenna colaadda saaqday*
*Dadkeenna jirrey ku keentay*
*Dhib iyo diif aan hadhaynin*

*Dagaalku wax buu gubaaye*
*Markuu dumay aayaheennu*
*Ayuu damay qaayaheennu.*

*Bulshada aan dawlad haysan*
*Dugaaguba wuu cunaaye*
*Difaaca maxaan u baahday.*

*Qurbaha goortaan ku daalay*
*Maxaan qaranyahow ku doonay*
*Inaad dib u soo istaagto.*

*Dadkaygu intuu israaco*
*Inuu dunidaa ka muuqdo*
*Maxaan rejadaa u daalay.*

*Maxaan calanyahow ku doonay*
*Dushayda intaan ku saaray*
*Maxaan beryo kuu duceeyay.*

*Daruuraha Caafimaadku*
*Markay ka da'aan dhulkeenna*
*Damiirka ayaa cagaari.*
*-2020*

## 3.4. TAARIIKH

*Anigoo ku taama*
*Tamartii Islaamka*
*Ka tisqaaday Saylac*
*Tawxiidka diinta*
*Marna tuuri maayo.*

*Waa tiir afkaygu*
*Abid soo taxnaaye,*
*Gabaygiyo tixdayda*
*Suugaanta toosan*
*Marna tuuri maayo.*

*Axmed Gurey tubtiisu*
*Xornimay tagtaaye*
*Daljir taalladiisa*
*Iyo tiro haldoora*
*Marna tuuri maayo.*

*Tiigsiga barwaaqo*
*Tartan buu rabaaye*

*Umaddayda toostay*
*Tabantaabadeeda*
*Marna tuuri maayo.*

*Gacankii Tojoorra*
*Iyo webiga Taana*
*Umaddayda teedsan*
*Taariikh midaysa*
*Marna tuuri maayo.*
*-2021*

## 3.5. XAQLIHII DHULKA

*Afkastooy dhigaan*
*Waan dhihi aqaan,*
*Dharkastooy tolaan*
*Anna waan dhexgalay.*

*Ifka dhinac kastaba*
*Dhoof baan ku maray,*
*War kastoo dhacana*
*Waan dhaaddanahay.*

*Cirkastoo dhibcaa*
*Wuu ii dhow yahay,*
*Dhulkastoo naqlena*
*Waan dhigay cagaha.*

*Carabtaan la dhamay*
*Dhaydiisa geel,*
*Hindidaan la dhaqay*
*Lo'da geeska dheer.*

*Shiinaan dhis idhi*
*Dayrkooda dherer,*
*Dhagax baan u raray*
*Haramkii dhidbane.*

*Afrikaan dhex galay*
*Dhirta kaymahaa,*
*Yurub baan ku dhaxay*
*Dheef raadiskii.*

*Waxa dhuuni jira*
*Dheri baan ku shubay,*
*Waxa caado dhigan*
*Waa dhaqankayaga.*

*Dhaayaha ku arag*
*Madow dhuxula iyo*
*Inaan dhool cad ahay,*
*Iyo midab dhexda ah*
*Maariin dhalaal.*

*Dhami qaaradaha*
*Dhalad baan ka ahay,*
*Xaqlihii dhulkiyo*
*Waxan ahay dhexroor*
*Soomaali dhaba.*
*–2023*

# Qaybta Afraad

## 4.1. QUDDUS

*Arladii qudduuska*
*Qudhun baa ku daatay,*
*Qalbigii Islaamka*
*Dhiig baa qulqulaya.*

*Quddus oohinteedu*
*Waa qoon i gaadhay,*
*Shaam qayladeedu*
*Waa qabar i haysta.*

*Falasdiin qaxeeda*
*Waan qamandhacyooday,*
*Xalab qiiqa taabtay*
*Qiiraan la ooyay.*

*Iigoor qafaalka*
*Qaac baa i saaqay,*
*Roohiinga qoolka*
*Naxdin baa i qoysay.*

*Kaashmiir qarkeeda*
*Shacabkayga qaaran,*
*Saca qoobka weyni*
*Kama qaado raafka.*

*Tix kastoon qoraayo*
*Xamar qiimaheeda*
*Qayb baan xusaaye*
*Qarax baa i ciilay.*

*In kastuu mid qooqay*
*Qarribaayo ciidda,*
*Jidka qaayihiisa*
*Qodax baa u taalla.*

*Kas akhriyay Quraanku*
*Marna quusan maayo,*
*Qisas baa ka buuxa*
*Hiyigayga qooya.*

*Ballanqaadka qeexan*
*Qof Israa ka dheehday,*

*Qaxarkii Dajaalku*
*Qulub kuma abuuro.*

*Qarni buu na haystay*
*Jahligii qadhaadhku,*
*Qorrax baa se kaahday*
*Mugdi qaawinaysa.*
*-2022*

## 4.2. QUSDANDIIN

*Qodax baa ka go'aysa Islaamka*
*Qarni dheer kaga taalay unuunka,*
*Qorraxdii ka ifaysay galbeedku*
*Qabrigii dhicistay u dhowaatay,*
*Bari oo sunta qooshi ogaana*
*Qirinqiir iyagaa rafanaaya.*

*Qaraxaad ka arkayso Yugraani*
*Berri qaaradda oo dhan ka fiiri,*
*Sug Dahraan qalalaasaha taabtay*
*Inta uu ka qaniinayo Shiine,*
*Israa'iil labadii u qornaana*
*Kii danbaa hadda gaadhay qarkiisa.*

*Khuraasaan qorraxdaa ka iftiintay*
*Shaam ayay ku xigtaa quruxdeedu,*
*Xaramkaa laga cuudin qataarka*
*Marka roobka Quraanku ku hooro,*
*Faaris baa lagu qaadi jihaadka*
*Ka xoreeya qadhmuun shirkigiisa.*

*Qusdandiin mar hadduu la wareego*
*Nacabkii qarniyaal u sabraayay*

*Waa astaanta qiyaame dhowaaday*
*Qabsashaa dabataal se wanaagsan.*

*Markii aan ka tallaabay Qarnaada*
*Qalabkayguna Rooma abbaaray*
*Cawar baa isna quusta is keenay*
*Balse Ciise ayaa qudha gooyay.*

*Anigoon kugu daalin qoraalka*
*Qarnigii casarliiqa la gaadhye*
*Qof kastoo Muslinoow is diyaari.*

*Qish markaan kugu siiyo tilmaanta*
*Ballankii dhabtu waaba qariibe*
*Ha ku raagin adduun qafladdiisa.*

# 4.3. UBIXII JANADA

*Yool waa Islaam*
*Qofka aaminee*
*Eebboow hanuun.*

*Ifkan geeddigaa*
*Aqal kama jantee,*
*Aakhiraan rabaa*
*Hoyga abadigaa.*

*Eray faylasuuf*
*Oon maba tiree,*
*Albaqraan cugtaa*
*Aayaadka culus.*

*Weedhaha anbaday*
*Anfac kama sugee,*
*Waxan urursadaa*
*Duco iyo adkaar.*

*Dhaldhalaal adduun*

*Aadame ku lumay*
*Higsi uma arkee*
*Cadan baan ogahay.*

*Guutada Iblays*
*Edeg lama degee*
*Aqal baan arkaa*
*Anbiyadu dhisteen.*

*Waxa urinayaa*
*Ubixii jannada,*
*Waxan urinayaa*
*Duni wada udgoon.*
*-2022*

# Qaybta Shanaad

## 5.1. TUSAALE

*Xalay libin tiigsigayga*
*Cirkaan tagay himiladayda,*
*Riyadu tamashlay ahayde*
*Dhulkaan subaxdii ka toosay*
*Ayaa taladii xumeeyay.*

*Shalay tabantaabadayda*
*Waxaan xidhay taajka guusha,*
*Qorshuhu tamar buu rabaaye*
*Dhiskii taallooyinkayga*
*Gacmaha tacabkaa ka seexday.*

*Xalay dayax taawilkayga*
*Tiriig baxayaan la rooray,*
*Nalkuba tookh buu ahaaye*
*Waxaan ugu faanay tooshka*
*Cadceed timi baa bakhtiisay.*

*Shalay kubbad toocsigayga*
*Garoonkaan tagay xamaasad,*
*Ciyaartu tab bay lahayde*
*Markaan cidla turanturrooday*
*Ayaan garankiiba tuuray.*

*Tilmaamaha maansadayda*
*Tusaale waxaan ku sheegay*
*Tallaabo intaanad qaadin*
*Tijaabi awoodahaaga.*

## 5.2. ADDOOMUHU WAA DANAYSTE

*Markuu dayaxaagu muuqdo*
*Iftiinkay daawadaane,*
*Mugdigu goortuu ku daaho*
*Ayay isha kaa dedaane*
*Addoomuhu waa danayste.*

*Dabkaagu markuu baxaayo*
*Dugsiga way kuududaane,*
*Dabayshu markay bakhtiiso*
*Ayay kaa wada durkaane*
*Addoomuhu waa danayste.*

*Cirkaagu markuu da'aayo*
*Durduurta ayay cabbaane,*
*Diraacdu markay ku hayso*
*Ayay dacal kaa maraane*
*Adoomuhu waa danayste.*

*Cawayskii  derajadaada*
*Durbaankay kuu tumaane,*

*Markaad duubkaaga weydo*
*Ayay dulli kula simaane*
*Addoomuhu waa danayste*

*Xusuusta adoon ku daalin*
*Wixii hebel kaa dulguuray,*
*Habeenka duruufahaaga*
*Ayaa dadka lagu bartaaye*
*Qofkii daacada ilaasho.*

# 5.3. DARIIQA ILAYSKA

*Habeenkan dayowga keenay*
*Ma raacayo dawyadiisa,*
*Dariiqa ilayska raagay*
*Waxaan socod uugu daalay*
*Cadceedi inay danbayso.*

*Qadhaadhkan agtayda daadsan*
*Ma doono inaan cantuugo,*
*Dibnaha dhadhamada u xiisay*
*Waxaan samir ugu dabbaalay*
*Macaanka sug kuu daboolan.*

*Diraacdan abaartu faaftay*
*Naftayda ma daajinaayo,*
*Cagaarkiyo doogga fiilay*
*Waxaan dhaayaha dalxiisin*
*Daruurtu markay timaaddo.*

*Dabayshan idlaysay xaabka*
*Ka diiday inaan ammaano,*
*Dareenka dhirtay xasuuqday*
*Dusheeda inaan ka heeso*

*Damiirku ma qaadanaayo.*

*Dayaxa himilooyinkayga*
*Jannaan ka dhex daawadaaye,*
*Dhulkiyo derajooyinkiisa*
*Haddii dadka qaar u waasho*
*Cirkaan ahay ruux dawaafa.*
*–2023*

## 5.4. DARUURTA REJOOYINKAYGA

*Diraacdii murugadayda*
*Gu'gii farxaddaa ku daatay,*
*Shalay iyo diiqaddeeda*
*Damaashaad baa ka reeyay.*

*Dayowgii maalmahayga*
*Dariiqa cad baa u jeexmay,*
*Qurbiyo dibad meeristooda*
*Dhulkii hooyaan ka doortay.*

*Hurdada indhahayga doonay*
*Bal eeg durba way gamaane,*
*Wax badan lugahayga daalay*
*Bal eeg durba way nastaane.*

*Dhawaaqa afkayga daayay*
*Bal eeg durba wuu qoslaaye,*
*Tixaha caqligayga diiday*
*Bal eeg durba wuu gabyaaye.*

*Daruurta rejooyinkayga*
*Dabayshu ma qaadi doonto,*
*Dayaxa himilooyinkayga*
*Habeenku ma daahi doono.*

## 5.6. Bashar

*Dhaqanka dadku waa badweyne*
*Biyaha xeelliga ku koobso,*
*Basharku waa jaadba jaade*
*Bustaan kasta ubax ka gooso.*

*Haddaad dhinac bayr ku leeday*
*Ha moodin inay bannaantay,*
*Dadkuba booguu qabaaye*
*Baxnaani hagaagistaada.*

*Ayaanku hadduu bukoodo*
*Ha tirin uun baylahdaada,*
*Bidhaanta ku soo islaami*
*Waxaa barkhad taal agtaada.*

*Astaan bini aadmi weeye*
*Hilmaan oo beer xun daaqe,*
*Badweynta wanaagyadaada*
*Ku qari balliyada xumaanta.*

*Ayaamaha baadidaada*
*Ha noqon sharka buun afuufa,*
*Intaad u badheedho khayrka*

*Naftaydaay kalafur buugga.*
*–2023*

## 5.7. Bushaaro

*Bakhaanbakha guulaheenna*
*Berraynu u heesaynaaye,*
*Bilkhayr adigoo dhahaaya*
*Bushaaro u sheeg naftaada.*

*Barwaaqada caashaqeenna*
*Berraynu la ciidaynaaye*
*Badhaadhe adoo filaaya*
*Baxnaani cirkeenna hooray.*

*Rejadan kaaheedu baahay*
*Bidhaami adoo rumaysan,*
*Farxaddan barbarkeenna joogta*
*Bariidi adoo qoslaaya.*

*Xubbigan beertiisu hawrtay*
*Ka dhawr baaba'a nacaybka,*
*Midhahan boholyawga fiilay*
*Biyaha caashaqa waraabi.*

*Habeenkii baylahdeenna*
*Hadduu yara baaqday nuurku,*
*Cadceeddii berisamaadku*

*Wa taa dhalatee u soo bax.*
*–2023*

## 6.0 Xogta Abwaanka

Magacaygu waa Cali Sh. Maxamed Cabdi, oo ku magacdheer Cali Ileeye. Waxaan ahay qoraa, abwaan, turjumaa iyo nuxur-abuure. Waxaan ku dhashay agagaarka degmada Balligubadle, ee koonfurta magaalada Hargeysa dabayaaqada sannadkii 1990-kii. Kaydka afeed ee sahayda ii ah, waxa aan kala imi kanbalkii aan ku soo barbaaray, oo ahaa mid kulmiyay bar xoolaad iyo beer qodaal. Waxbarashayda, dugsi Quraankii ugu horreeyay waxaan ka galay magaalada Balligubadle. Dugsigii hoose/dhexe waxaan ku dhammaystay mac-hadka Islaamiga ah ee al-Huda, ee Hargeysa. Dugsigii sare oo ku baxayay

manhajka Suudaan, waxaan ku qaatay dugsigii al-Niilayn, ee Hargeysa.

Dabayaaqadii sannadkii 2009 waxaan deeq waxbarasho ugu baxay dalka Suudaan. Waxaan derajada koowaad ee cilmiga maamulka ganacsiga ka qaatay jaamacadda Khartuum, sannadkii 2014. Miyi, tuulo, magaalo iyo qurbeba cimrigayga qayb ka mid ah ayaan ku soo qaatay, haddana waxaan deganahay, oo aan ka shaqeeyaa magaalada Xamar. Waxaan hore u qoray buugaagta kala ah Xabag Barsheed: Miisaanka Maansada Soomaaliyeed, Halhaysreeb:Xulka Maansada Cali Ileeye, iyo Antikiriistoos : Dajaal Korayaa Qarsoon. Waxaan qormooyin la xidhiidha afka, suugaanta, fikirka diinta iyo culuumta nafdhiska ku baahiyaa mareegtayda iyo baraha bulshada ee kala duwan. Sida oo kale

waxaan leeyahay qaar ka mid ah heesaha ugu saamaynta badan waayadan danbe, kuwaas oo qaarkood diiwaankan ku qoran yihiin.

Kadib markii aan yaqiinsaaday dhibaatooyinka Soomaalida haysta in uu salkoodu yahay wacyidarro, aniga oo adeegsanaya qalinka, waxaan suugaantayda ku baraarujiyaa dareenka iyo damiirka Soomaalida. Waxaan rumaysnahay duullaanka afeed iyo ka dhaqan, ee ay wadaan Faranjiga ilbaxnimada ku soo gabbanaya iyo Carabiga diinta ku soo dhuumanaya, in lagaga hortagi karo horumarinta Soomaaliga iyo hodminta maktabaddiisa.



E-mail: caliiileeye@gmail.com
Whatsapp:
+252612924436/+252634776153
Facebook: Cali Ileeye
(www.facebook.com/ileeeye1)

# DHAMAAD